



OCTOBER 14, 2020

WAR SAXAAFADEED

ˋDAWLADDA SOOMAALIYA OO DIYAARISAY ISTIRAAJIJIYADDA QARAN EE KHAYRAADKA BIYAHAD



Biyaha ayaa kaalin muhiim ah kaga jira geeddi-socodka horumarineed ee Soomaaliya. Waxay saamayn ku leeyihiin dhamaan dhinacyada wadashaqaynta, koboca dhaqaale iyo faayadhawrka, sidoo kalena qayb weyn kaga jiraan qorshaynta heer qaran iyo habraacyada istiraatiijiyadeed ee la xiriira. Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha (WTKHB), oo taageera ka helaysa hay'adaha caalamiga ah ay wadashaqaynta kala dhaxayso, iyo dhinacyada kale ee ay khusaysa, ayaa ku hawlan hogaaminta diyaarinta Istiraatiijiyadda Qaran ee Khayraadka Biyaha dalka.

“Horumarinta Istiraatijiyyadda Qaran ee Maarataynta Khayraadka Biyaha ayaa imanaysa xilli dalku khataro kala duwan waajahayo – markii laga soo tago caabuqa COVID-19, dalka ayaa la daalaa-dhacaya abaro iyo daadad soo noqnoqday. Caqabadahan ayaa culays badan ku haya horumarka bulsho iyo midka dhaqaale ee dalka waxaana laga ma maarmaan inoo ah inaan ka gaarno xal kama dambays ah isla markaana ah mid waara. Sidaa awgeed, taageerada iyo wadashaqaynta dhinacyada kala duwan ee dalka iyo hay’adaha caalamiga ah ayaa ah mid muhiimad gaar ah leh. Sidoo kale waa inaan horumarinaa hannaan aan isukugu duwardino dadaallada iyo mashaariicda socda una samayno qorshe cad horumarinta biyaha dalka”. **Marwo Fowziya Maxamed Sheekh, Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha.**

Wasiir Xamza Saciid, Wasiirka Gargaarka iyo Maarataynta Musiibooyinka, ayaa isana hoosta ka xariiqay muhiimadda ay leedahay in qorsha adag laga sameeyo daadadka soo noqnoqday ee ka dhaca gobollada qaar iyo biya la’anta ka jirta gobollo kale kuwaas oo dhaliya xaalado bini aadannimo oo aad u adag.

Qorshaha Horumarinta Qaran ee 2020 – 2024 ayaa qeexaya habraac hagaya Istiraatijiyyadda Qaran ee Maarataynta Khayraadka Biyaha. Horumarinta iyo maarataynta togan ee khayraadka biyaha, bixinta adeegyada biyaha iyo maarataynta khataraha biyaha la xiriira ayaa meel weyn ka galaya taabba galinta Qorshaha Horumarinta Qaran.

Haddaba aragtida fog ee biyaha dalka ayaa ah sida soo socota:

Xaqijinta helitaanka biyo saamayn waarta le, loo siman yahay, kuwaas oo xoojiya midnimada qaran, koboca iyo faayadhawr dhamaan shacabka, iyadoo deegaanka la dhawrayo”.

Aragtida qorshahan ayaa ku salaysan afar yool oo kala ah:

- Kor u qaadidda dawrka biyuhu ku leeyhiin midnimada, kobaca iyo badqabka bulshada
- Xoojjinta hannaanka maarataynta buuxda ee khayraadka biyaha.
- Dhisidda adkaysiga ka dhanka ah musiibooyinka iyadoo loo marayo taabba galinta horumar waara
- Xaqijinta sinnaanta, wax soo saarka, iyo adeeg bixin waarta

Iyadoo aragtidan iyo yoolalkeeda laga jawaabay, waxaa la garawsaday in ka mira dhalinteeda ay laga ma maarmaan u noqonayso habraac marxalada is xig-xiga iyo qayba kala duwan ka kooban kuwaas oo fududeeya in dalka uu si fiican uga mira dhaliyo. Geeddi socodkan ayaa ku billawday Luuliy 2019 hannaan wadatashi oo loo maray diyaarinta qorshayaasha iyo arrimaha mudnaanta ku leh istiraatijiyyadda.

Shirkii wadatashi ee hore ayaa qaboomay Maarsro 2020 iyadoo ay ka qayb qaateen dhinacya kala duwan sida Dawladda Federaalka, Dawlad Goboleedyada, shirkadaha gaarka loo leeyahay, ururrada bulshada rayidka iyo hay’adaha caalamiga ah, NGO-yada iyo deeqbixiyeyaasha. Shirkan ayaa waxaa ka dambeeyay shirar wadatashi oo ka qaboomay Dawlad

Goboleedyada Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka si loo aruuriyo xogta ku saabsan arrimaha mudnaanta iyaga u leh.

Shirkan 2^{aad} ee Istiraatijiyyadda Qaran ee Maaratinta Khayraadka Biyaha ayaa ku qabsoomay Muqdisho, Soomaaliya 12^{ka} ilaa 14^{ka} Oktoobar 2020, waxaana ka soo qaybgalay xubno ka kala socda wasaaradaha Xukuumadda Federaalka, Dawlad Goboleedyada, Bulshada Rayidka, Deeq Bixiyeyasha, hay'adaha horumarineed iyo NGO-yada intaba. Shirkan ayaa xoogga saaray qaabaynta qorshayaasha iyo arrimaha mudnaanta leh ee ku saabsan afar dhinac oo muhiim ah oo kala ah b) Hannaanka maamul ee biyaha t) Maaratinta buuxda ee khayraadka biyaha j) Maaratinta khataraha iyo musiibooyinka biyaha ku lugta leh iyo u adkaysiga isbedelka cimilada x) Iisticmaalka biyaha ee wax ku oolka ah iyo bixinta adeegyada biyaha ee mudnaanta leh.

Isagoo u hadlaya Barnaamijka Horumarineed ee Qaramada Midowday (UNDP), Mudane Cabdul Qadir ayaa ka hadlay wadashaqaynta dhaw ee kala dhaxaysa Dawladda Soomaaliya arrimaha horumarinta Istiraatijiyyadda Qaran ee Maaratinta Khayraadka Biyaha, isagoo ammaanay hoggaaminta qaran ee Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha, Wuxuuna sheegay in ka qaybgalinta dhinacyada kala duwan ee ay khusayso iyo hay'adaha caalamiga ee qeexista yoolalka istiraatijiyyadeed ay u noqonayso aasaas adag fulinta hawlahu mudnaanta leh.

Wasiiradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha ayaa gabagabadii shirka ku nuux-nuuxsatay muhiimadda ay leedahay sii wadista wadashaqaynta wasaaradaha heer Federaal iyo heer Dawlad Goboleed iyo dhinacyada kale ay khusayso intaba, iyo sidoo kale muhiimadda ay leedahay istiraatijiyyaddan in dhamaan la isla meel dhigo, aasaaska hoose laga soo dhiso, loona qoro hab toos u taabanaya horumarinta qaybta biyaha ee dalka.

Muddadan nagu soo foolka leh, xiriir dheeri ah ayaa la la samayn doonaa dhinacya kala duwan si loo xaqqiyyo in habraacyadan ay noqdaan kuwo wax ku ool ah isla markaana ahaadaan kuwo la jaanqaadaya habraacyada kale ee dalka ka socda. Wuxaana sidoo kale la samayn doonaa habraac isku xiraya istiraatijiyyadda iyo hawlahu muhiimadda leh ay si wadajir ah iskula meel dhigi doonaan Dawladda Federaalka iyo deeq bixiyeyasha beesha caalamka.

Dhamaad